

Filimka cimiladda > Nidaamka

Cimiladda


Waa maxay cimiladdu? Cimiladdu waxaa loo sharaxi karaa sida isbeddela ku dhaca jawiga hawadda marka wakhtiyo la dhaafay. Waxyaabaha kala duwan ee ay ka koobantahay nidaamada cimiladdu waxay ku tiirsanyihiin oo ay la fal galaan midba midka kale. Cimiladdu had iyo jeer waxay ku jirtay isbeddel joogta ah, oo sababo badan, labbadaba dabiici iyo kuwa aadaamahu sameeyayba. Waxay ka ciyaaraan door. 30-40 sanadood ee u dambeeyay waxaanu aragnay in cimiladdu ay isku beddelayso si ka degdeg badan si la sharaxi karo iyaddoo ay keentay isbeddelo dabiici ah, oo waxaanu haynaa baadhitaano badan in kululaanshaha cimiladda adduunku ay dhacday. Guddida cimiladda Qaramadda Midoobay waxa uu ugu badnaan si buuxda ugu qanacsanyahay iyo sharaxaada ugu muhiimsan ay jiipto hawsha aadamaha taas oo keentay ku si ibadashada gaaska greenhouse gudaha atmoosfeerka, iyo kaas oo ka qayb qaadanaya xoojinta ku xanibnaanta diirimaadka qorraxda atmoosfeerka hoose.

Waajibaadyada la dhammaystirayo ka hor inta aanad arag filimka

1. Waa maxay faraaq u dhexeeya cimiladda iyo jawiga hawaddu?
2. Maxaa saameeya heer kulka meeraha?
3. Sidee ayay cimiladdu isku beddeshay in ka badan kumanaan sanadood?

Waajibaadyada la xidhiidha filimka

1. Nidaamka cimiladdu waa maxay waxa uu ka samaysanyahay?
2. Sidee ayuu uga jiraa faraaq sidaa aadka ugu way nee heekuladda u dhexeeya gobolada kulaalaha iyo cidhifyada addunka?
3. Sharax sida faraaq heerkulka u dhexeeya gobolada iyo cidhifyada adduunka uu u saameeyo dabaylaha meeraha iyo qulqulka bad waynta. U isticmaal sawiradda hose sharaxaadaada.



4. El Niño iyo la Niña waa magacyada labbada nooc ee jawiga hawadda dhinacyada badan ee badda iyo atmoosfeerka Badwaynta Baasifiga, taas oo u dhacda si aan caadi ahayn oo muddo u dexayso. Sharax sifooyinka el Niño.
5. Tusaale ka bixi sida el Niño ay u saamayso noocyada jawiga hawadda baaxaddo balaadhan oo meeraha ama dhulka ah.
6. Tixraac dhacdooyinkii taariikhda ahaa ee el Niño si loo sharaxo sababta isbeddelo yar oo nidaamka cimiladda ah ay ugu yeelan karaan cawaaqib wayn cimiladda meerahan dhulka ah.
7. Sidee ayay cilmi baadhayaashu u isticmaalaan muunad baraf ah si ay u xisaabiyaan heer kulka iyo CO₂ ka koobanyahay ee ku jiray atmoosfeerka dhowr boqol oo kun oo sano dib marka wakhti loogu noqdo?
8. Qalooqa sawirka hoose ku yaala waxa uu muujinayaa heer kuladdii dhacay muddadi 400 000 sanadood ee u dambeeyay. U isticmaal qalooqa si aad go'aan uga gaadho haddii uu jiray casrigii barafku ama muddada diirimaadka ee u kala dhexaysay casrigii barafka 400 000 dalashadii Ciise Horteed dalashadii Ciise Horteed, 200 000 dalashadii Ciise Horteed. iyo 1850 dalashadii Ciise Dabadii.



9. Maxay ahaan lahaayeen sababaha ceceliska heerkula meerahan dhulka ah ee kala duwanaa 400 000 sanadood ee u dambeeyay?
10. Ma odhan karnaa in uu jiro xidhiidh ka dhexeeya dhexda qalooqa CO₂ iyo qalooqa heerkulka muddadii 400 000 sanadood ee u dambeeyay. Isku day in aad sharaxdo waxa loola jeedo erayga "xidhiidhka".
11. Ka dib 1850 heerarka adkaanshaha ee CO₂ ee ku jira atmoosfeerka in ay si wayn u korodhay. Maxaa keenay sare u kaca?
12. Sababtee ayay cilmi baadhayaashu u rumaysanyihiin in heerarka kordhay ee adkaanshaha CO₂ ee ku jirta atmoosfeerku ay u keeni doontaa celceliska heer kulka sare ee meeraha dhulka?

13. Sharax erayga 'faallo celin'.
14. Bad baraf ah oo uu ku gedaamanyahay baraf waxay dib u soo celisaa ilayska qorraxda ee 85–90 %, marka biyahu ay dib u soo celiyaan ilays ah 10 %. Nabbaadka iyo cammuuda madow waxay dib u soo celiyaan ilayska qorraxda ee 20 %. Maxaad u malaynaysaa in uu ku dhici doono heer kulka Dhulka haddii barafku dhalaalo ?
15. Bixi saddex tusaale oo ah 'faallo celin'.

1. Waajibaadyo la sii xoojiyay

2. Soo ogow waxay tahay la Niña. Sababtee ayaynu ugu yeedhnaa el Niño wejiga kulul iyo la Niña wejiga qabow?
3. Sharax qaababka kala duwan ee ay ku shaqeeyeen cilmi baadhayaashy jaantuus u samaynta isbeddeladii hore ee cimiladda.
4. Sababtee ayay u adagtahay in la qeexo gebegabada sidii sababta isbeddelada cimiladda?